Ontario Health atHome

# Xeerka Xuquuqda Bukaanka

Bukaan ahaan, xubin qoyska ka tirsan, wakiil qof kale ama daryeele ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad fishoo in shaqaale kasta oo ka tirsan Ontario Health atHome, xubin ka tirsan Guddiga iyo bixiye adeeg caafimaad oo qandaraas la galay uu ixtiraamo oo uu kor ugu qaado xuquuqdaada sida soo socota:

1. **In laguula dhaqmo si xushmad leh** iyo in laga madhnaado xadgudubyada jireed, galmo, maskaxeed, shucuureed, af iyo dhaqaale.
2. **In laguula dhaqmo si ixtiraamaysa sharaftaada iyo asturnaantaada,** taasina waxay kor u qaadaysaa madaxbannaanidaada iyo ka-qaybgalkaaga go'aan qaadashada.
3. **In laguula dhaqmo si aqoonsanaysa shakhsiyaddaada** taasina waa mid xasaasi ah oo ka jawaabaysa baahiyahaaga iyo waxyaabaha aad doorbidayso, oo ay ku jiraan doorbidyada ku salaysan qowmiyadaha, ruuxda, luqadda, qoyska iyo arrimaha dhaqanka.
4. **Inaad hesho adeegyada daryeelka guriga iyo bulshada oo ka xor ah takoor** sida ku xusan Xeerka Xuquuqda Aadanaha ama Axdiga Xuquuqda iyo Xorriyadda Kanada.
5. **Bukaanka ah Qowmiyadaha Koowaad, Métis ama Inuk** wuxuu xaq u leeyahay inuu helo adeegyada daryeelka guriga iyo bulshada oo **dhaqan ahaan ammaan ah**.
6. Inaad ku hesho macluumaad cad oo ku saabsan adeegyada gurigaaga iyo daryeelka bulshada qaab aad heli karto.
7. **Inaad uga qayb qaadato qiimaynta iyo dibu-qiimaynta baahiyahaaga**, iyo sidoo kale horumarinta iyo dibu-eegista qorshahaaga daryeelka.
8. **Inaad doorato in qof kula joogo inta lagu jiro qiimeynta**, iyo inaad **ka-qaybqaadato horumarinta,** qiimaynta iyo dibu-eegista qorshahaaga daryeelka.
9. **Inaad hesho caawimo ku saabsan isku-dubaridka adeegyadaada.**
10. **Inaad sii ama diido ogolaanshaha** bixinta adeeg kasta oo guri iyo daryeel bulsho ah.
11. **Inaad soo bandhigto walaacyada ama aad ku taliso isbeddello** la xiriira adeegyada aad hesho, iyo siyaasadaha iyo go'aamada saameeya danahaaga, adiga oo aan ka baqayn faragelin, qasab, takoor ama aargoosi.
12. **In lagugu wargeliyo sharciyada, qawaaniinta iyo siyaasadaha** saameyn ku yeelanaya bixinta adeegyada daryeelka guriga iyo bulshada, oo ay ku jiraan Xeerka Xuquuqda Bukaanka, iyo in qoraal ahaan laguugu wargeliyo hababka lagu bilaabayo cabashooyinka ku saabsan adeegyada aad helayso.